


## Wararkii u dambeeyay ee raritaanka

Meeqa qoys ayaan taageero siinay?

Kooxdayada u qaabilsan howlaha dib-u-dejinta ayaa aad ugu da'daalay inay caawimaan boqolaal qoys oo ku nool Flemington iyo North Melbourne.



**461**

qoysaska laga caawiyay inay guuraan



**774**

guryaha loo diyaariyay in lagu guuro



**484**

qoysaska dib-u-dejinta loo sameynayo



**61%**

waxay doorteen inay sii deganaadaan xaafadoodii



## Wixii ku soo kordhay dib-u-dejinta Flemington

Iyadoo ay harsen qoysas aan tiro badneyn waxaan bixineynaa taageero kasta.

**Kaalay oo la hadal kooxdayada ama la xiriir howlwadeenkaaga u qaabilsan howlaha dib-u-dejinta.**  
**Isniinta ilaa Jimcaha 9-ka subaxnimo ilaa 5-ta galabnimo**

Xarunta dib-u-dejinta  
33 Alfred Street  
North Melbourne



## In wax kasta la idinla soo socodsiiyo



**Kulamada la isku xog wareysanayo**



**Ra'yigii nalagula wadaagay kulamadii wadatashiga**



**Isdiwaangeli si aad ula socoto wixii soo cusboonaado**


Si aad wax kasta ula socoto booqo:



[homes.vic.gov.au/flemington-precinct](https://homes.vic.gov.au/flemington-precinct)



nagala soco baraha bulshada raadi  
**Homes Victoria**



Somali | Soomaali

Oktoobar 2025

**h v homes victoria**

**BIG HOUSING BUILD**

**Wixii kusoo cusboonaaday**  
Bulshada Flemington



## Waxa ka socda goobta

**Dhisida guryaha cusub oo wali ka socda goobta Holland Court.**

Derbiyada bannaanka ayaa la taagay wiishka guryaha dhisana waa la dejin doonaa

**Shaqo korontada la xiriirta ayaa waxay ka socotaa 126 iyo 130 Racecourse Road**

Bixinta mukeyfyada mustaqbalka iyo in guryo cusub loo diyaariyo Holland Court.

## Dhamaystirka dib-u-dejinta

Taageerada joogtada ah ee loogu talagalay qoysas aan tiro badnayn oo sii joogaya.

**Howlaha dhismo ee Holland Court**

Qurxinta dibadda ee dhimasaha Holland Courta oo soo muuqanaysa.

Homes Victoria waxay qirayaan una mahad celinayaan Milkiilayaasha Dhaqanka iyo Mas'uuliyiinta dhulka aan ku shaqeynayno inagoona ixtiraam u muujinayna iyaga, dhaqamadooda iyo Odayashoodii hore iyo kuwa hadda nool.



Howlo dhisme ayaa ka socda

## Holland Court: 286 guri oo cusub iyo barxad loogu talagalay dadweynaha



Hal wiish oo ah wiishashka wax dhisa ayaa meesha laga saari doonaa inta u dhaxaysa Sabtida 11-ka iyo Isniinta 13-ka bisha Oktoobar



Gawaari waaweyn ayaa isticmaali doonta Holland Court (wadadaas) balse way usii furnaan doontaa dadka goobta degan



Dad baabuurta kala haga ayaa halkaas joogi doona si ay u hagaan baabuurta



Waxay goobta ku sugnaan doonaan shaqaaluhu laga bilaabo 6-da subaxnimo ilaa 6-da galabnimo



Howlo shaqo oo sii soconaya si loogu diyaar garoobo xiritaanka mukeyfyada

126 iyo 130 Racecourse Road



Howlo shaqo oo waxyaabaha korontada la xiriira

126 Racecourse Road



Xoogaa hawlo shaqo oo la xiriira korontada oo ka soconaysa 126 si ay u taageeraan dhismaha Holland Court (waa lagula socod siin doonaa haddii adeegyada qaar la hakinayo).



## Taageero loogu talagalay kiraystayaasha goobta ku haray

120 Racecourse Road

### Xarunta dib-u-dejinta

9-ka subaxnimo ilaa 5-ta galabnimo Isniinta ilaa Jimcaha  
33 Alfred Street  
North Melbourne



### Shaqo ayaa ka socon doonta gudaha dhismayaasha



Sugidda iyo samaynta guryo bannaan oo ammaan ah



### Sugidda meelaha la faaruqiya

12 Holland Court

### Waxaa laga yaabaa inaad aragto:

- Dhaqdhaqaaq gawaarida waaweynka ah oo dheeraad ah ayaa laga dareemi doonaa Holland Court iyadoona wiishka wax dhisa meesha laga saari doono
- Xoogaa shanqadh ah ayaa la maqli doonaa maadaama guryihii laga baxay la baarayo isla markaasna meelaha laga galo dabaqyada la sugayo.

Wax howlo shaqo oo wax dumis ah ma dhici doonaan inta dhismayaalka la degan yahay.



Xilliyada aan shaqeyn doono waxaa hagaya saacadaha shaqada caadiga ah ee Golaha deegaankaaga:

**Isniin ilaa Jimce** inta u dhaxaysa 7-da subaxnimo iyo 6-da fiidnimo

**Sabti** inta u dhaxaysa 9-ka subaxnimo iyo 3-da galabnimo

Dadka goobta degan ee u baahan macluumaad dheeraad ah ha la xiriiraan xafiiska guriyeynta ee deegaankooda:



1300 360 462



ascotvale.housing@dffh.vic.gov.au



Mararka qaar waxaa loo baahan doonaa fasax laga heysto golaha deegaanka si howlaha shaqo looga qabto saacadaha ka baxsan xilliyadaas balse waanu la socodsiiin doonaa dadka deegaanka haddii ay taasi dhacdo.

## Jadwalka howlaha shaqo ee la qaban doono intaan wax la dumin

12 Holland Court iyo  
120 Racecourse Road

### Halkan ayaan joognaa



### Inaad wax badan ogaato oo ay waxkastana ammaan kuu ahaadaan



Sugidda guryaha bannaan



Kormeerista goobta iyo dhismayaasha si loo maareeyo agabka



Joogteynta howlaha dayactirka

### Dabayaaqada 2025



### Diyaargarowga

- Diyaarinta goobta iyo in calaamadaha meel kasta lagu dhajiyo si loo xaqiijiyo badbaadada
- Hubinta isku xirka adeegga
- Ka dhigida meel ay mari karaan dadka lugeynaya, baabuurta iyo dhigashada baabuurta baarkinada la geli karo
- Biraha laisku rakibo in la diyaariyo gudaha dhismahana shaqada laga bilaabo

### Horaanta 2026



### Duminta

- In la dhameystiro biraha laisku rakibayo
- Waxa gudaha ku dhisan in lasoo saaro
- Si taxadar leh in loo dumiyo dhismaha
- Si joogto ah in bulshada loola socodsiiyo wixii soo cusboonaada



Si aad u hesho macluumaad ku qoran luqadaada booqo [homes.vic.gov.au/information-in-your-language](https://homes.vic.gov.au/information-in-your-language)



Wixii su'aalo guud ah ee aad qabto iimayl ku dir



enquiries@homes.vic.gov.au

Oktoobar 2025

## Howlaha shaqo iyo kulamada soo socda ee ka dhici doona Flemington

Dhammaan howlaha shaqooyinka waxaa lagu fulin doona heerarka ugu sarreeya ee badbaadada iyo shuruudaha sharciga.